Mashruuca Grenfell Memory




# Soo-jeedimaha Wadatashiga Rasmiga ah

19 Maayo 2026 – 11 Agoosto 2026

**Buug-yaraha wadatashiga**

LONDON FIRE BRIGADE

# Tusmada


**Arar – Jonathan Smith, Guddoomiyaha Dab-damiska London** **1**

**Ku saabsan dukumeentigan wadatashi** **2**

**Sooyaalka** **3**

Yaa loogu talagalay Mashruuca Grenfell Memory? 4

Soo-jeedimaha asalka ah ee Mashruuca Grenfell Memory 5

Habkayaga cusub ee lagu horumarinayo Mashruuca Grenfell Memory 5

Sida aynu u horumarinayno Mashruuca Grenfell Memory 6

**Soo-jeedimaha wadatashiga (jawaab u ah ra'yi-celintii hore)** **7**

Soo-jeedimaha wadatashiga 8

Sidee ayay ra'yi-celinta kaqeybgelinta ee wadatashiga kahor u qaabaysay soo-jeedimahayaga wadatashiga 10

Sida mashaariicda la soo-jeediyay loo fulin doono 12

**Tubta soo-jeedimaha kamadambaysta ah iyo tallaabooyinka xiga** **15**

**Waxyaabaha ay tahay in la tixgeliyo** **16**

**Ra'yigaaga dhiibo** **17**

# Arar

Waad ku mahadsan tahay wakhtiga aad ku bixisay inaad ka qayb qaadato wadatashigan dadweyne ee Mashruuca Grenfell Memory. Diyaar u ahaanshahaaga inaad ka qayb qaadato si qoto-dheer ayaa looga mahadnaqayaa.

Dukumeentigan wuxuu qeexayaa soo-jeedimahayaga Mashruuca Grenfell Memory, kaasi oo lala dejiyay qaansheegtayaasha Xallinta Khilaafaadka ee Beddelka ah (ADR), oo ay ku jiraan xubnaha qoyska ee dhow ee dadkii geeriyooday, badbaadeyaasha iyo dadka deegaanka. Sharaf weyn ayay inoo ahayd in aynu dhegaysano dadka nala wadaagay mahadhadooda, fikradahooda iyo rajadooda intii lagu gudajiray marxaladda kaqeybgelinta wada-tashiga kahor ee sannadkii hore. Waxyaabaha ay nagu biiriyeen ayaa si toos ah u qaabeeyay talooyinka lagu xusay warbixinta kaqeybgelinta wadatashiga kahor, waxaana jeclaan lahaa inaan shaqsi ahaan qof kasta oo ka qayb qaatay uga mahadceliyo furfurnaantooda, deeqsinimadooda iyo kalsoonidooda.

Dabkii Grenfell Tower ee 14 Juun 2017 wuxuu ahaa dabkii ugu weynaa ee ka dhaca Boqortooyada Ingiriiska tan iyo Dagaalkii Labaad ee Adduunka. Saameyntiisa ayaa sii socota inay dareemaan qoysaska iyo asxaabta ay ka dhinteen dadkii ay jeclaayeen, badbaadeyaasha, dadkii degganaa, iyo bulshada ballaaran ee ku dhaqan North Kensington, waxayna si qoto-dheer ugu taalaa damiirkayaga qaran. Sabab ayay sidoo kale u ahayd isbeddel weyn oo ka dhex dhacay London Fire Brigade (LFB), taasoo nagu dhiirrigelisay inaan si qoto-dheer uga fikirno, aan dib u habeyn ku sameyno hawlgalladayada iyo inaan ka shaqeyno sidii aan dib ugu heli lahayn kalsoonida bulshooyinka Grenfell.

Mashruuca Grenfell Memory wuxuu ka dhashay heshiis magdhow oo madani ah oo la gaaray 2023-kii oo dhex maray qaansheegtayaasha ADR iyo tiro ururo eedaysanayaal ah, oo ay ku jirto guutada LFB. Waxay qayb ka tahay safarka Cawilcelinta Caddaalada ah ee ballaaran. Inkastoo aan ognahay in weli ay wax badan harsan yihiin, haddana mashruucan wuxuu doonayaa inuu:

- gacan ka geysto wanaajinta xiriirka ka dhexeeya guutada LFB iyo bulshooyinka uu saameeyay dabkii Grenfell Tower
- xushmeeyo nolosha dadkii geeriyooday
- abuuro dhaxal macno leh oo waara si loo xuso dabkii Grenfell Tower.

Wadatashigan wuxuu ku martiqaadayaa qoysaska, asxaabta iyo xubnaha bulshada Grenfell inay wadaagaan aragtidooda ku saabsan soo-jeedimahayaga Mashruuca Grenfell Memory. Waxaa jira dhowr qaab oo aad uga qayb qaadan karto, sida ku xusan qaybaha dambe dukumeentigan. Aragtidaadu waa muhiim, waxaana naga go'an inaan si taxaddar leh oo xaqdhawr leh u dhegaysano wax kasta oo aad noo soo sheegto kahor inta aan la gaarin wax go'aano ah. Waan kaaga mahadnaqayaa wakhtigaaga iyo codkaaga, waxaana rajeyneynaa inaan warkaaga maqalno.

**Jonathan Smith**

Guddoomiyaha Dab-damiska London



**Cawilcelinta Caddaaladda ah waa…**

"Iyadoo la tixgelinayo, wadahadallada iyo hirgelinta tallaabooyinka ay qaadi karaan dhinacyada ay khuseyso, si loo asteeyo loona xuso dabkii Grenfell Tower iyo dadkii ku dhintay ama waxyeelladu soo gaartay dabka awgiis."

Heshiiska Magdhowga Madaniga ah, 2023

# Ku saabsan dukumeentigan wadatashi

Buug-yarahan ayaa dulmar guud ka bixinaya soo-jeedimahayaga wadatashiga rasmiga ah ee Mashruuca Grenfell Memory. Agab taageero oo dheeraad ah ayaa sidoo kale laga heli karaa bog-mareegeedkayaga gaarka ah oo ay ka mid yihiin, guutada madaxa-bannaan ee Warbixinta Kaqeybgelinta Wadatashiga Kahor, Qiimeynta Saamaynta Sinnaanta, Qorshaha Kaqaybgelinta Wadatashiga iyo Wadaxiriirada, Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo (FAQs), iyo agabyo la turjumay oo si Fudud loo Akhriyi karo.

Agabyada waxaa loogu talagalay inay kaa caawiyaan inaad bixiso ra'yi-celin wargal ah oo macno leh.

Buug-yarahan waxaa weheliya Su'aalaha Wadatashiga ee **Mashruuca Grenfell Memory**. Fadlan buuxi oo dib noogu soo dir si bilaash ah adoo isticmaalaya cinwaanka soo socda:

**Grenfell Memory Project London Fire Brigade**
**169 Union Street, London SE1 0LL**

Baqshadaha FREEPOST ayaa la heli karaa marka la codsado.

Buug-yarahan waxaa sidoo kale laga heli karaa mareegtayada, oo sidoo kale waxaa lagu heli karaa qaabab kale sida turjumaada luuqadaha bulshada iyo qaab Si Fudud Loo Akhriyi Karo. Haddii aad u baahan tahay macluumaadkan oo qaab kale ah, waxaan sameyn doonaa sida ugu fiican si aan u fulino codsiyadaada.

Waad codsan kartaa adigoo iimayl ku soo diraya sanduuqayaga gaarka ah ee: **grenfell.engagement@london-fire.gov.uk**, ama farriin gaaban noogu soo diraya lambarka **07385 382 580** adigoo xusaya waxa ay baahiyahaagu yihiin.



**Willie Thompson** Ka badbaadaha Dabkii Grenfell Tower ahna xubin ka mid ah Guddiga La-talinta ee Madaxa-bannaan ee Guutada LFB.

# Sooyaalka

London Fire Brigade (LFB) waxaa u sugnaaday ballanqaad muddo dheer socday oo ah dhegaysiga iyo la macaamilka dadkii uu noloshoodu saameeyay dabkii Grenfell Tower. Tani waxaa ku jira qoysaska u dhow marxuumiinta, badbaadayaasha, dadka deegaanka iyo bulshooyinka ballaaran ee Grenfell.

Mashruuca Grenfell Memory waa hal qayb oo ka mid ah hawshan socota wuxuuna ku jiraa Ballanqaadyada Cawilcelinta Caddaalada ah ee ay sameeyeen guutada LFB ee hoos yimaada Heshiiska Magdhowga Madaniga ah ee lala gaaray qaansheegtayaasha codsaday Xallinta Khilaafaadka ee Beddelka ah (ADR) bishii Maarso 2023.

Ka qayb ahaan heshiiskan, Guddoomiyaha Dab-damiska London (LFC) ayaa ballanqaaday **£8.25 milyan** si loo abuuro Mashruuca Grenfell Memory. Ujeedada mashruucu waa in la dhiso dhaxal macno leh oo waara oo lagu maamuusayo 72-kii qof ee ku geeriyootay dabkii Grenfell Tower, iyadoo la taageerayo bogsasho wadajir ah iyo soo kabasho bulsheed. Heshiisku wuxuu sidoo kale dejiyay mabaadi'i cad oo khuseysa sida mashruuca loo horumarin karo. LFC wuxuu ballanqaaday inuu hubiyo in soo-jeedimaha kamadambaysta ah ay:

- ilaalin doonaan oo kor u qaadi doonaan danaha qaansheegtayaasha ADR, iyo
- qaabeyn doonaan wadatashiyo dadweyne oo dhammaystiran oo macno leh oo lala yeesho bulshooyinka North Kensington iyo Grenfell.

LFB waxaa ka go'an inay kala tashtaan bulshooyinka Grenfell tafaasiisha Mashruuca Grenfell Memory ee la soo-jeediyay.

Marka laga soo tago qiyamyada guutada LFB, Mashruuca Grenfell Memory waxaa hagaya mabaadi'ida aasaasiga ah ee Cawilcelinta Caddaalada ah (RJ):

- Ixtiraamida sharafta aadanaha;
- Run sheegid iyadoo loo marayo wadahadal;
- Midnimo iyo Mas'uuliyad; iyo
- Caddaalad iyo Isla Xisaabtan.

Mabaadi'idani waxay tilmaamayaan sida mashruuca loo horumarinayo.



**Emma O'Connor** Ka badbaadaha dabkii Grenfell Tower, ahna xubin horay uga tirsanayd Golaha Bulshada ee LFB ahna Hoggaanka Saldhiga Dab-damiska ee Charles Barton, Green Watch, North Kensington.

## Yaa loogu talagalay Mashruuca Grenfell Memory?

Dabkii Grenfell Tower wuxuu lahaa saameyn ba'an oo daba-dheeraatay – ma aha oo kaliya mid saamaysay xubnaha qoyseed ee ugu dhow 72-kii qof ee geeriyooday, balse sidoo kale dadkii ka badbaaday, deriska, iyo guud ahaan bulshada North Kensington. Saameyntiisa ayaa tan iyo maanta la dareemayaa, oo ay ku jiraan dad tan iyo markaa guuray ama ka fogaaday aagga.

Marka aan ka hadlayno 'bulshooyinka North Kensington iyo/ama Grenfell' – iyo cidda Mashruuca Grenfell Memory loogu talagalay inuu ka faa'iidaysto – waxaan ula jeednaa kooxaha soo socda:

- Xubnaha qoyska ee dhow ee dadkii geeriyooday, oo ay ku jiraan xaasaska ama lammaanayaasha, waalidiinta, carruurta, walaalaha, awoowayaasha/ayeeyooyinka, ilmaha awoowayaasha/ayeeyooyinka loo yahay, iyo qaraabo uu qoysku magacaabay.
- Dadkii ka badbaaday dabkii Grenfell Tower, iyo dadkii ku noolaa meel Dhismaha u jirta 500 mitir.
- Xubnaha kale ee qoyska u dhow ee ay 72-ka qof ka geeriyoodeen.
- Dadkii hore ee Grenfell Tower degganaa ee joogay dhismaha xilligii dabku kacayay balse tan iyo markaa ka guureen.
- Dadka deggan North Kensington ee ku noolaa waaxyaha soo socda xilligii mashruuca la fulinayay: Golborne, Colville, Notting Dale, St Helen's iyo Dalgarno.
- Qaansheegtayaasha ADR, kuwaasi oo laga yaabo inay ka tirsan yihiin mid ama in ka badan kooxaha kor ku xusan.

Mashruucan waxaa loogu talagalay in lagu aqoonsado, lagu taageero laguna sharfo dadka ay noloshoodu saamaysay musiibada – ha ahaado khasaare gaar ah, ka badbaadis, iyo barakac ama mahadhadooda muddada dheer qaadatay ee dabkii Grenfell Tower.



**Intlak Alsaiegh** (midigta fog ee buluugga ah) Maareeyaha Mashruuca Fayo-qabka Waayeelka ee Al Manaar – Xarunta Dhaqanka Islaamka, oo ay weheliyaan haween maxalli ah oo ka socda bulshada.

## Soo-jeedimaha asalka ah ee Mashruuca Grenfell Memory

Aragtida bilowga ah ee Mashruuca Grenfell Memory oo ay soo bandhigeen qaar ka mid ah qaansheegtayaasha ADR iyadoo loo marayo qareennadooda waxaa ka mid ahaa saddex mashruuc oo isku xiran:

- **Kaydka Xusuus-dhiga** – kayd dhijitaal ah oo ilaalinaya diiwaanada, markhaati-furada iyo agabyada kale ee la xiriira Grenfell, oo ay ku jiraan markhaatiyada goobta ku sugnaa iyo markhaati-furada gaarka ah.
- **Bandhig Xusuuseed** – goob lagu wadaago sheekooyinka, mahadhooyinka iyo waxbarashada la xiriirta Grenfell.
- **Mashruuc Wacyigelin Waxbarasho ah** – barnaamij shan sano ah oo dhacdooyin la xiriira xusuus-dhiga iyo bandhigga, oo ay ku jiraan deeqaha waxbarasho ee wacyi-gelinta ah. Ujeeddadeedu waxay ahayd in la hubiyo in casharrada laga bartay Grenfell, iyo mahadhada dadka ay saamaysay, lagu soo daro tababarka iyo waxbarashada socota ee xirfadaha iyo sancada khuseeya.

## Hanaankayaga cusub ee aan u adeegsaneyno horumarinta Mashruuca Grenfell Memory

Tan iyo markii la gaaray heshiiskii madaniga ahaa, dhowr dhacdo oo muhiim ah ayaa dhacay – oo ay ku jiraan Toddobaadka Markhaati-furka Grenfell, wadatashiga Golaha Boqortooyada ee Kensington iyo Chelsea (RBKC) oo ku saabsan hindisayaasha Cawilcelinta Caddaalada ah, iyo dhammaystirka Wejiga 2-aad ee Baaritaanka Grenfell Tower. Wadajir ahaan, dhacdooyinkan waxay ku dhiirigeliyeen guutada LFB inay hakad geliso oo ka fikirto in soo-jeedintii asalka ahayd ee magdhowga madaniga ah ay si fiican u buuxisay baahiyaha, waxyaabaha mudnaanta leh iyo rajada qaansheegtayaasha ADR iyo bulshada ballaaran ee Grenfell.

Isla mar ahaantaana, shaqooyin kale oo la xiriira ayaa sii socday, sida qorshayaasha RBKC ee xusuus-dhiga Caddaaladda Bulshada (oo ay ku jirto aarkiifiyada Grenfell) iyo wadatashiga Guddiga Xusuus-dhiga ee Grenfell Tower ee mustaqbalka ee khuseeya goobta Grenfell Tower. Geedi-socodyadaan is barbar socda ayaa naga caawiyay hagitaanka fikirkayaga waxayna iftiimiyeen baahida loo qabo caddayn, isku-dubarid iyo baahida loo qabo in la kordhiyo maalgelinta si looga fogaado ku labannoqodka.

> Kahor inta aan la maalgelin barnaamijyada cusub, waxaa muhiim ah in la ogaado adeegyada jira oo si toos ah lagala hadlo da'yarta iyo ururada maxalliga ah waxa dhiman ama aan kheyraad ku filan loo hayn.
>
> **Badbaadaha iyo xubin qoyseed u dhow marxuumka**



**Nick Burton** Ka badabaadaha dabkii Grenfell Tower, ninkeeda ayaa ku geeriyooday dabka waana xubin horay uga tirsanayd Golaha Bulshada ee Guutada LFB.

# Sooyaalka

Toddobaadka Markhaati-furka Grenfell ee Janaayo 2024 wuxuu ahaa mid si gaar ah muhiim u ah. Afar maalmood gudahooda, 47 qof oo xubnaha qoyseed ee marxuumka ah, badbaadayaasha iyo dadka deegaanka ayaa wadaagay markhaati-fur xooggan oo qoto-dheer oo gaar ah iyadoo loo marayo wax ku biirino, duubisyo, hadallo qoraal ah iyo farshaxan.

Qaar badan ayaa ka hadlay ururada/shirkadaha ay aaminsan yihiin inay mas'uul ka ahaayeen musiibada. Erayadoodu waxay ahaayeen kuwo daacad ah, shucuur leh oo toos ah – waxayna xoojiyeen farriin cad: wixii dhaxal ah ama xusuus ah waa inay qaabeeyaan codadka dadka saameynta ugu badan soo gaadhay. Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa: **www.testimonyweek.co.uk**

## Sida aynu u horumarinayno Mashruuca Grenfell Memory

Si loo hubiyo in Mashruuca Grenfell Memory loo qaabeeyo si fikir iyo hufnaan leh, guutada LFB ayaa diyaarinaysa oo ka dhigaysa saddex marxaladood:

**Marxaladda 1 Kaqeybgelinta wadatashiga kahor**

**Marxaladda 2 Wadatashi rasmi ah**

**Marxaladda 3 Go'aan qaadasho**

Hannaankan marxaladaha ah waxaa loogu talagalay in lagu hubiyo in mashruuca lagu horumariyo wadahadal dhab ah oo lala yeesho dadka loogu talagalay inuu Mashruuca Grenfell Memory u adeego.



# Soo-jeedino wadatashi (jawaab-celin u ah ra'yi-celintii hore)

Intii u dhaxaysay Febraayo iyo Juun 2025, guutada LFB ayaa mar qabatay kaqeybgelinta wadatashiga kahor. Intii lagu gudajiray wakhtigan, waxaan diiradda saarnay dhageysiga qaansheegtayaasha ADR – oo ay ku jiraan xubnaha qoyska ee u dhow marxuumka, badbaadayaasha iyo dadka deegaanka – waxaana daahfurnay warbixin madax-bannaan si aan u qorno wixii aan maqalnay. Warbixintan ayaa laga heli karaa mareegtayada **https://www.london-fire.gov.uk/media/s12mpb4g/summary_grenfell-memory-project-report-final-v05_somali.pdf**

Warbixintu waxay soo bandhigtay talooyin dhowr ah oo khuseeya waxa uu Mashruuca Grenfell Memory ka koobnaan karo iyo sida loo fulin karo. Guutada LFB waxay ballanqaaday inay si dhab ah u qaadato talooyinkan – iyadoo si taxaddar leh u eegaysa mid kasta oo sahaminaysa sida loogu beddeli karo qorshayaal wax-ku-ool ah oo macquul ah.

Si aan arrintani u sameyno, waxaan u shaqeynay si isdabajoog ah oo dib-u-milicsi leh. Taasi ayaa ka dhigan in fikradaha si tartiib ah loo dejiyo, tallaabo-ka-tallaabo, iyadoo marxalad kasta ay qaabaynayso waxa aynu ka barannay marxalladii ka horreysay. Markii ay soo-jeedinadu ay unkameen, si faahfaahsan ayaynu dib ugu sii eegnay si aan u hubino inay yihiin kuwo la awoodi karo, sharci ahaan sax ah oo dhab ahaan suurtogal ah in la fuliyo. Geedi-socodkani ayaa sii socday ilaa aan ka diyaarino dukumeentiyada wadatashiga rasmiga ah iyo waraaqaha maamul wanaaga.

> Waa muhiim in la xusuusnaado in wadahadallada ku saabsan £8.25 milyan ay ku saleysan yihiin xaqiiqada naxdinta leh ee 72-ka qof oo geeriyootay.
>
> **Warqad wadajir loo soo saaray oo ka timid qoysaska u dhow marxuumka**



# Soo-jeedino wadatashi (jawaab-celin u ah ra'yi-celintii hore)

## Soojeedinada wadatashiga

Soo-jeedinadu waxay diiradda saarayaan **shan hindise oo muhiim ah** oo ka dhashay kaqeybgelinta wadatashiga kahor:

### 1 Barnaamijka deeqaha shanta sano ah ee Mashruuca Grenfell Memory ee daboolaya saddex qaybood oo kala duwan

**A. Deeqaha Xusuusta Gaarka ah**

Loogu talagalay xubnaha qoyska ee ugu dhow marxuumka.
**£3m muddo 5 sano ah**

**B. Deeqaha loogu talagalay da'yarta uu saameeyay dabkii Grenfell**

Da'yartu xaq ayay u yeelan karaan inay codsadaan deeqaha haddii ay buuxiyaan mid ka mid ah waxyaabahan soo socda:

**a)** haddii ay da'doodu ahayd 16–25 jir xilligii dabka Grenfell Tower, ayna qayb ka ahaayeen bulshada North Kensington iyo/ama Grenfell markuu dhacayay dabka; AMA

**b)** haddii uu ahaa da'yar jiray 30 sano ama wixii ka yar xilligii mashruuca la fulinayay, oo leh baahiyo dheeraad ah*, kana soo jeeda bulshada North Kensington iyo/ama Grenfell.
**£1m muddo 5 sano ah**

**C. Deeqaha adkeysiga bulshada**


Maalgelinta kooxaha uu sida aan kala sooca lahayn u saameeyay dabkii Grenfell iyo hawlaha bulsheed ee Sannad-guurada Dabkii Grenfell.
**£1m muddo 5 sano ah**

### 2 Barnaamij shan sano soconaya oo hoy iyo hawlo maalinle ah

Si loo taageero horumarka gaarka ah, kalsoonida iyo xirfadaha nololeed ee da'yarta da'doodu u dhaxayso 11–15 sano xilliga mashruuca la fulinayo iyo dadka ku nool North Kensington iyo/ama ka tirsan bulshooyinka Grenfell.
**£1.5m muddo 5 sano ah**

*__Baahiyaha dheeraadka ah__ waxaa loola jeedaa la noolaanshaha naafanimo, wajihida caqabadaha bulsheed ama kuwa gaarka ah, ama la kulanka silac.

> "Qoys kasta oo qaraabo dhow ah… ayaa go'aamin kara waxa ay rabaan inay sameeyaan… Xorriyadda naqshadeynta iyo xuska xaqiiqooyinkayaga dhabta ah halkii si joogto ah ay cid kale u samayn lahayd iyadoo loo marayo kooxo iyo hindisayaal wax takooraya."
>
> **Xubin qoyseed u dhow marxuumka**




Qayb ka mid ah **'Wall of Truth'**, oo ay samaysay bulshadu, oo ku yaala buunadada jidka dul marta ee Westway.

# Soo-jeedino wadatashi (jawaab-celin u ah ra'yi-celintii hore)

3 **Barnaamij wacyigelin oo shan sano ah oo taageeraya dadka ku dhex nool bulshooyinka North Kensington iyo Grenfell ee danaynaya shaqooyinka ka badqabka dabka. Kani wuxuu noqon doonaa barnaamij sannadle ah oo kor loogu qaadayo wacyigelinta iyo fursadaha, aqoon-is-weydaarsiyada bartilmaameedka leh iyo bixinta maalgelinta shahaadada ka badqabka dabka ee habboon**

Hawlaha wacyigelinta waxay ujeedadoodu tahay in kor loo qaado wacyiga, iyo bixinta macluumaad, hagitaan, iyo taageero loogu talagalay fursadaha shaqo ee ka badqabka dabka iyo aqoonta loo baahan yahay si loo sii wado. Sannad kasta, 12 qof ayaa awoodi doona inay ka qayb qaataan taxane aqoon-is-weydaarsiyo ah (lix) oo ay wadaan xirfadlayaal khibrad u leh ka badqabka dabka oo ka socda guutada LFB.

Fadhiyada aqoon-is-weydaarsiga waxay bixin doonaan talo wax-ku-ool ah, aragtiyo shaqo iyo taageero si loo codsado Shahaadada Ka Badqabka Dabka ee Heerka 3-aad ah oo ay bixiyaan bixiyeyaasha tababarka ee dibadda. Fadhiyadani waxay sidoo kale bixin doonaan taageero iyo talo khuseysa codsiyada doorarka ka badqabka dabka ee heerka koowaad ah ee guutada LFB iyo ururada kale.

Kharashaadka taageeradan iyo shahaadada Ka Badqabka Dabka ee Heerka 3-aad ah waxaa si buuxda u maalgelin doona Mashruuca Grenfell Memory.

Waxaa la filayaa in barnaamijkani uu horumarin doono awoodda xubnaha bulshooyinka North Kensington iyo Grenfell ee ay saameeyeen dhacdooyinkii naxdinta lahaa ee dabka Grenfell Tower si ay u helaan koorso ka badqabka dabka ah ayna u codsadaan shaqooyinka ka badqabka dabka ee guutada LFB iyo ururada kale.
**£300,000 muddo 5 sano ah**

4 **Dhimista musiibooyinka mustaqbalka** Horumarinta agabka waxbarasho/Barashada Socota ee Xirfadaha (CPD) (iyadoo la adeegsanayo daraasadaha qotoda-dheer ee dabkii Grenfell) ka qayb ahaan saamaynaya isbeddelka dhaqameed ee deegaanka jira. **£300,000**

5 **Daraasad suurtogalnimo (ballanqaad lahayn)**
Si loo qiimeeyo jiritaanka iyo waaritaanka xarun bulsho oo diiradda saarta dhalinyarada gudaha aagga dabku qabsaday ee Grenfell. **£60,000**

> "Tan iyo dabkii Grenfell, rabshadaha ka dhacay aagga ayaa sare u kacay, sidoo kale caafimaadka maskaxeed, ee da'yarta. Shaqaalayntu sidoo kale hoos ayay u dhacday."
>
> **Deggane la shaqeeya da'yarta deegaanka**

Marka la isku soo duubo, soo-jeedimahan waxay ujeedadoodu tahay in la xushmeeyo 72-ka qof ee geeriyootay, in gacan laga geysto in casharrada Grenfell la sii wado, iyo in la taageero dadka ay saamaynta gaadhay sii socoto, iyadoo la dhammaystirayo – aan dib loogu noqonayn – hindiseyaasha bulsheed ee jira.

# Soo-jeedino wadatashi (jawaab-celin u ah ra'yi-celintii hore)

## Sida ra'yi-celinta kaqeybgelinta wadatashiga kahor ay u qaabaysay soo-jeedinayadayada wadatashi

| Dulucda | Waxa warbixintu ku talisay | Waxa la soo-jeediyay | Waxa arrintani la rabo in wax looga qabto/ sababta | Aaggaga ra'yi-celin |
|---|---|---|---|---|
| **Xusuusta shaqsiyeed iyo xusuusashada ay qoysku hormuudka u yihiin** | Qorshe deeq ah oo loogu talagalay taageeridda mashaariicda xusuusta shaqsiyeed | Deeqo hal mar ah oo loogu talagalay xubnaha qoyska ee u dhow marxuumka, oo ay kaabayso talo ka timid kooxda Kaqeybgelinta Grenfell **(£3m muddo 5 sano ah)** | Wuxuu aqoonsan yahay in xusuustu ay tahay mid gaar ah oo dhaqan ahaan kala duwan, iyo in xubnaha dhow ee qoyska ay rabi lahaayeen inay u sharfaan dadka ay jecel yihiin qaabab kala duwan | Taageerada soo-jeedinta: Shuruudaha u-qalmitaanka, baahiyaha taageerada codsadayaasha |
| **Taageerada da'yarta uu saameeyay dabkii Grenfell (16–25 sano jirka ahaa xilligii dabkii Grenfell Tower) AMA da'doodu ahayd ilaa 30 sano jir oo qaba baahiyo dheeraad ah** | Deeqaha dabacsan ee waxbarashada, tababarka iyo horumarinta | Deeqaha loogu talagalay hawlaha xirfadeed, tababarka iyo waayo-aragnimada **(£1m muddo 5 sano ah)** | Waxay qiraysaa khalkhalka muddada dheer ku yimid Grenfell oo ku dhacday kooxdan intii lagu gudajiray marxaladda nololeed ee koboca | Taageerada soo-jeedinta: Shuruudaha u-qalmitaanka |
| **Da'yarta (11–15 sano) qaangaarnimada hore** | Hawlaha taageera horumarka shaqsiyeed, kalsoonida iyo xirfadaha nololeed | Barnaamij hoy iyo hawlo maalinle ah oo la bixiyo iyadoo loo marayo ururada is-xilqaamka ee maxalliga ah **(£1.5m muddo 5 sano ah)** | Wuxuu wax ka qabtaa daldaloolada qoondeynta deegaanka ee badqabka leh ee qaabaysan wuxuuna taageeraa horumarka gaarka ah ee da'yarta, kalsoonida iyo xirfadaha nolosha | Taageerada soo-jeedinta: Hannaanka iskaashiga |
| **Barashada, kahortagga iyo isbeddelka** | Waxay adeegsataa waayo-aragnimo nololeed si loo saameeyo ku dhaqanka, gaar ahaan jawiga jira | Ku biirinta markhaati-furada Grenfell barashada xirfadeed; maalgelinta xilli hore ah si loo dardargeliyo isbeddelka qaybta **(£300k)** | Waxay ka jawaabtaa baaqyada ku aaddan dabkii Grenfell inuu horseedo isbeddel dhab ah, oo waara iyo inuu mahadhada ku biiriyo tababarka xirfadeed ee ka dhex dhacaya jawiga jira | Taageerada soo-jeedinta: Xirfadaha ay tahay in lagu lug yeesho |

# Soo-jeedino wadatashi (jawaab-celin u ah ra'yi-celintii hore)

| Dulucda | Waxa warbixintu ku talisay | Waxa la soo-jeediyay | Waxa arrintani la rabo in wax looga qabto/ sababta | Aaggaga ra'yi-celin |
|---|---|---|---|---|
| **Wacyigelin si loo helo tababar iyo xirfado khuseeya ka badqabka dabka** | Taageerida tubaha loo maro shaqada | Barnaamij sannadeedka kor u qaadista xirfadaha wacyigelinta ee ka badqabka dabka, aqoon-is-weydaarsiyada bartilmaameedka ah iyo maalgelinta shahaadada ka badqabka dabka ee habboon **(£300k)** | Awoodda korodhay ee dadka ka soo jeeda bulshada dhibku soo gaaray iyo dadka danyarta ah si ay u helaan koorsada ka badqabka dabka iyo shaqooyinka ka badqabka dabka | Helitaanka |
| **Hindisayaasha ay bulshadu hormuudka ka tahay** | Taageer mashaariicda bulsheed, ee dhaqan ahaan habboon | Sannad-guurada dabkii Grenfell iyo deeqaha bulshada ee bartilmaameedka leh **(£1m muddo 5 sano ah)** | Waxay taageertaa bogsashada, isku xirnaanta iyo kooxaha sida aan kala sooca lahayn uu u saameeyay dabkii Grenfell | Taageerada soo-jeedinta |
| **Xarun bulsheed** | Sahami goob bulsheed oo joogto ah | Daraasad madax-bannaan oo suurtogalnimo ah (lama ballanqaadin taageero) **(£60k)** | Tijaabooyinka in xarun waarta ay tahay mid macquul ah, la doonayo oo la gaari karo | Haddii ay xaruntu leedahay mudnaan bulsheed |
| **Qorshaha xaaladda lama filaanka ah** | U dabacsanaanta waxyaabaha mudnaanta leh mustaqbalka | **£1.09m** oo la hayo si looga jawaab-celiyo natiijooyinka wadatashiga iyo in lacag lagu biiriyo xarunta, iyadoo lagu saleynayo natiijooyinka daraasadda suurtogalnimada | Hubinta in lacagaha aan la kharash garayn ay la jaanqaadayaan waxyaabaha mudnaanta u leh bulshada | Maxaa mudnaan u leh lacagta aan la kharash gareyn |

# Soo-jeedino wadatashi (jawaab-celin u ah ra'yi-celintii hore)

## Sida mashaariicda la soo-jeediyay loo gaarsiin doono

Dhammaan qaybaha Mashruuca Grenfell Memory waa la horumarin doonaa iyadoo ay si joogto ah uga qayb qaadanayaan qoysaska u dhow marxuumiinta, badbaadayaasha iyo bulshada guud. Taasi waxay ka dhigan tahay in qorshayaashu ay sii wadi doonaan inay si wadajir ah u nashqadeeyaan oo ay u qaabeeyaan dadka loogu talagalay inay taageeraan, iyagoo hubinaya inay ka turjumayaan baahiyaha dhabta ah, waxyaabaha mudnaanta leh iyo rajooyinka.

### Barnaamijka deeqaha shanta sano ah

Qayb weyn oo ka mid ah mashruuca waa barnaamij deeqo ah, kaasi oo aynu higsaneyno inaan u fulino hal qaab oo cad oo leh taageero kala duwan. Hannaankani wuxuu saamaxayaa dabacsanaan isagoo weli hubinaya in geeddi-socodku uu yahay mid caddaalad ah, hufan oo si wanaagsan loo maareeyo.

Si loo hubiyo in deeqaha si habboon loo maareeyo, guutada LFB waxay eegaysaa inay la shaqeyso urur madax-bannaan oo leh khibrad dhab ah iyo taariikh adag oo khuseysa socodsiinta barnaamijyada deeqaha. Barnaamijka deeqaha waxaa lagu horumarin doonaa laba marxaladood:

- **Marxaladda naqshadeynta** – Waxaan rabnaa inaan si dhow ula shaqeyno dadka iyo kooxaha deeqahaan loogu talagalay inay taageeraan si loo qaabeeyo shuruudaha iyo geedi-socodka. Iyadoo la adeegsanayo talo khabiir, marxaladdan waxaa lagu heshiin doonaa waxyaabo ay ka mid yihiin cidda soo codsan karta, waxa la maalgelin karo iyo sida geedi-socodku u shaqayn doono.
- **Marxaladda gaarsiinta** – Danwadaag madax-bannaan oo ka tirsan waaxda is-xilqaamka ayaa markaa loo magacaabi karaa inuu maamulo barnaamijka. Waxay maarayn doonaan codsiyada, waxay bixin doonaan deeqaha, waxayna la socon doonaan sida lacagta loo kharash gareeyo, iyagoo dib ugu soo warcelin doona guutada LFB si ay u hubiyaan in wax walba si sax ah loo qabtay.

> "Horay ayaan u sameeyay mashruuc lagu xusuusto aabahay. Aad ayaan maskixiyan ahaan u daalanahay sidaas darteed waxaan u baahanahay maalgelin ku aaddan kharashyada aasaasiga ah ee socodsiinta mashruuca – waa sida aan u isticmaali lahaa lacagta Xusuusta Gaarka ah."
>
> **Xubin qoyseed u dhow marxuumka**



# Soo-jeedino wadatashi (jawaab-celin u ah ra'yi-celintii hore)

Hannaankan waxaa loogu talagalay in bulshadu udub dhexaad looga dhigo go'aan qaadashada, iyadoo la hubinayo in deeqaha loo bixiyo si xirfad leh, caddaalad ah oo isla xisaabtan adag leh.

**Barnaamij hawleed shan sano ah oo loogu talagalay da'yarta deegaanka**

Intii lagu gudajiray kaqeybgelinta wadatashiga kahor, dadka waaweyn iyo dhallinyaradu waxay noo sheegeen inay rabaan fursado badan oo ay da'yartu ku kobacdo, ku yeeshaan kalsooni kuna bartaan xirfado muhiim ah oo nololeed oo ka baxsan kuwa dugsiga. Waxaan sidoo kale aqoonsannay inuu jiro farqi dhab ah oo u dhexeeya taageerada da'yarta ay da'doodu u dhaxayso 11–15 jir, gaar ahaan marka ay timaado barnaamijyada qaabaysan ee socda in muddo ah oo bixiya hagitaan joogto ah.

Si aan uga jawaab-celino arrintan, waxaan soo-jeedinaynaa barnaamij shan sano ah oo safarro guri ah iyo hawl maalmeedyo loogu talagalay da'yarta da'doodu u dhaxayso 11–15 jir ee ka soo jeeda bulshooyinka North Kensington iyo Grenfell. Ujeeddadu waa in la caawiyo da'yarta:

- **Dhis kalsooni**
- **Yeelo saaxiibo cusub**
- **Xooji xirfadaha bulsheed**
- **Horumari xirfadaha nololeed ee taageeri doona marka ay qaangaaraan**

Hawlaha ayaa dhici doona inta lagu gudajiro fasaxyada dugsiyeed, shanta sano ee soo socotana barnaamijku wuxuu higsanayaa inuu bixiyo ilaa 600 oo boos.

Barnaamijka waxaa loogu talagalay da'yarta waxaana fulin doona koox ka kooban ururo maxalli ah oo jira oo leh taariikh wanaagsan iyo waayo-aragnimo dhanka la shaqaynta da'yarta ah. In sidan ula shaqayso waxay kaa caawinaysaa in laga fogaado ku labannoqodka oo si fiican ayaa loo adeegsanayaa xirfadaha iyo aqoonta horay uga dhex jirtay bulshada.

Si loo taageero fayo-qabka da'yarta, shaqaalaha maamula hawlaha waxay sidoo kale heli doonaan tababar caafimaadka dhimirka ah, waxaana laga yaabaa inay la shaqeeyaan adeegyada NHS. Tani waxay gacan ka geysan doontaa dhisidda xirfado muddo dheer ah oo ay yeeshaan shaqaalaha maxalliga ah waxayna taageertaa talooyinka ka soo baxa warbixinta madaxa-bannaan ee wadatashiga kahor si loo xoojiyo iskaashiga iyo awoodda bulsheed.

**Barnaamij wacyigelin oo shan sano ah oo taageeraya dadka ku nool bulshooyinka North Kensington iyo Grenfell kuwaasi oo xiiseynaya shaqooyinka ka badqabka dabka.**

Kani wuxuu noqon doonaa barnaamij sannadle ah oo lagu horumarinayo wacyigelinta iyo fursadaha, aqoon-is-weydaarsiyada bartilmaameedka leh, wuxuuna bixin doonaa maalgelin loogu talagalay shahaadada ka badqabka dabka ee ku habboon.

Hawlaha wacyigelinta waxay ujeedadoodu tahay in kor loo qaado wacyiga, iyo bixinta macluumaad, hagitaan, iyo taageero loogu talagalay fursadaha shaqo ee ka badqabka dabka iyo aqoonta loo baahan yahay si loo sii wado.

> “Xusuustu ma aha oo kaliya in dib loo eego wixii la soo maray – waa waxa naga caawiya inaan horay u socono.”
>
> **Qof da'yar ah oo badbaaday**

Iyadoo la raacayo magdhowga madaniga ah, guutada LFB waxay dabooli doontaa dhammaan kharashaadka keenista. Tani waxay ka dhigan tahay £8.25 milyan oo buuxda oo loogu talagalay Mashruuca Grenfell Memory ayaa si toos ah u aadi doonta bulshada.

# Soo-jeedino wadatashi (jawaab-celin u ah ra'yi-celintii hore)

Sannad kasta, 12 qof ayaa awoodi doona inay ka qayb qaataan taxane aqoon-is-weydaarsiyo ah (6) oo ay maamulaan xirfadlayaal khibrad u leh ka badqabka dabka oo ka socda guutada LFB. Fadhiyada aqoon-is-weydaarsiga waxaa ku jiri doona talo-bixin wax-ku-ool ah, aragtiyo shaqo iyo taageero si loo codsado Shahaadada Ka Badqabka Dabka ee Heerka 3-aad oo ay bixiyaan bixiyeyaasha tababarka ee naga baxsan. Fadhiyadani waxay sidoo kale bixin doonaan taageero iyo talo khuseysa codsiyada doorarka ka badqabka dabka ee heerka bilowga ah ee Guutada LFB iyo ururo kale dhexdooda.

### Dhimista musiibooyinka mustaqbalka

Marka laga hadlayo la diyaarinta agabka waxbarashada iyo Barashada Socota ee Xirfadaha ee sancada shaqo ee deegaanka la dhisay, guutada LFB waxay la shaqayn doontaa qoysaska danaynaya iyo xubnaha bulshada, hoggaamiyeyaasha sancada iyo horumariyayaasha kheyraadka waxbarashada/tababarka ee ku habboon si loo soo saaro agab ku habboon. Waxaan sidoo kale dooneynaa inaan sahmino suurtagalnimada in agabyada jira oo kale laga helo ilo kale.

### Soo-jeedinta daraasadda suurtogalnimada

Intii lagu gudajiray kaqeybgelinta wadatashiga kahor, dad badan ayaa sheegay inay rabaan xarun bulsho oo u dhow Grenfell Tower – goob wax-ku-ool ah oo soodhaweyn leh oo dadka isku xiri karta, ku bogsan karaan oo taageerta da'yarta. Maadaama Mashruuca Grenfell Memory uusan kaligiis fulin karin mashruucan, waxaan u baahanahay inaan ku kalsoonaano inuu yahay wax bulshadu runtii rabto, inuu dhaqaale ahaan waari karo oo uu leeyahay danwadaag ka dhigi kara inuu si dhab ah u shaqeeyo. Taasi waa sababta aan u soo-jeedineyno daraasad suurtogalnimo oo madax-bannaan. Daraasaddani waxay bixin doontaa qiimeyn cad oo xirfadeed oo aasaasiyaadka ah:

- **Ma jirtaa goob ku habboon**
- **Ma jirtaa baahi dhab ah oo ka dhex jirta bulshada**
- **Qiime noocee ah ayay ku kici lahayd**
- **Yaa maamuli lahaa maalin kasta**
- **Yay tahay inuu ku lug yeesho**
- **Sidee loo maalgelin karaa oo loo sii wadi karaa in la maamulo**

Daraasadaha noocan oo kale ah badanaa waa qaali oo kama dhex jiraan kooxaha bulshada badankooda. Iyadoo maalgelinaysa Mashruuca Grenfell Memory, bulshadu waxay heli doontaa talo khabiir, talooyin wax-ku-ool ah iyo qorshe macquul ah oo khuseeya waxa ay ku kici doonto in la hirgeliyo xarun.

Xitaa haddii daraasaddu ay ogaato in xaruntu aysan hadda shaqaynayn, weli faa'iido ayay yeelan doontaa. Waxay siin doontaa dadka deegaanka iyo kooxaha bulshada macluumaadka ay u baahan yihiin si ay fikradda u horumariyaan, u eegaan waxyaabaha beddelka u ah, u dhisaan iskaashiyo una horumariyaan mashaariic kale oo dhaxal-gal ah mustaqbalka.

> Mashruuca Grenfell Memory wuxuu leeyahay awood uu door xooggan uga ciyaaro kahortagga musiibooyinka mustaqbalka. Ma aha oo kaliya inuu diiwaangeliyo wixii dhacay, balse inuu ka dhigo saameynta aadanaha mid aad la iska indha-tiri karin. Sheekooyinka, daraasadaha qotoda-dheer, iyo casharradii laga bartay dabkii Grenfell waa in loo adeegsadaa isbeddelka dhaqanka iyo isla xisaabtanka deegaanka jira.
>
> **Badbaadaha iyo xubin qoyseed u dhow marxuumka**

> Waxaan aaminsannahay in xarunta bulshadu ay tahay fikrad xooggan. Waxay gacan ka geysan kartaa dib u hagidda da'yarta, oo uu ku jiro wiilka aan ilmo adeeraha nahay ... iyo carruurtayada, si ka fog dhaqanka lidka ku ah bulshada kuna wajahan jawi taageero maskaxeed iyo shucuureed leh. Xarun sidan oo kale ah waxay noqon doontaa mid togan, waxbarasho leh, oo ammaan ah oo loogu talagalay dhallinyarada iyo qoysaska labaduba –dhaxal muhiim u ah mustaqbalka.
>
> **Badbaadaha iyo xubin qoyseed u dhow marxuumka**

# Tubta soo-jeedimaha kamadambaysta ah iyo tallaabooyinka xiga

| | |
|---|---|
| **MARXALADDA KOOWAAD**<br>**Wadatashiga kahor** | Sannadka Cusub ilaa horraanta xagaaga 2025 |
| **Daabacaadda warbixinta wadatashiga kahor** | Deyrta 2025 |
| **Horumarinta soo-jeedinta** | Deyrta/Jiilaalka 2025 |
| **MARXALADDA LABAAD**<br>**La-tashi Dadweyne oo Rasmi ah** | Gu'ga/Xagaaga 2026 |
| **Daabacaadda warbixinta wadatashiga kadib** | Deyrta 2026 |
| **Dib-u-eegista wadatashiga kadib** | Jiilaalka 2026 |
| **MARXALADDA SADDEXAAD**<br>**Go'aanka iyo ku dhawaaqida soo-jeedimaha kamadambaysta ah ee Mashruuca Grenfell Memory** | 2027 |

# Waxyaabaha ay tahay in la tixgeliyo

Su'aalo xog-uruurin ayaad ka dhammaystiri kartaa onlaynka, oo laga heli karo mareegtayada
**https://www.london-fire.gov.uk/about-us/grenfell-tower-fire/grenfell-memory-project/**

Markaad ka fikirto soo-jeedimaha ku jira buug-yarahan, waxaa laga yaabaa inaad u aragto inay waxtar kuugu leeyihiin inaad ka fikirto waxyaabaha hoose:

- Ma nagu raacsan tahay ama khiaafsan tahay soo-jeedimaha Mashruuca Grenfell Memory?
- Ma kula saxan tahay caddada lacagta maalgelinta ee la soo-jeediyay? Noo sheeg sababta, oo xor u noqo inaad soo-jeediso wax kasta oo kale.
- Ma jiraa wax kale oo aad u malaynayso inaan tixgelinno kahor inta aan la gaarin go'aamada kamadambaysta ah?

**Aragtidaadu waxay si dhab ah u qaabayn doontaa waxa xiga ee dhici doona. Runtii aad ayaan u jeclaan lahayn inaan maqalno fikradahaaga – fadlan ku dhiirigeli qoyskaaga, deriskaaga iyo asxaabtaada qaybta ka ah bulshada Grenfell ama guud ahaan North Kensington inay iyaguna nala wadaagaan fikradahooda.**



# Ra'yigaaga dhiibo

Waxaa jira qaabab badan oo aad ku dhiiban karto ra'yigaaga. Waxaan rabnaa inaan kuugu fududeyno sida ugu macquulsan inaad noola wadaagto aragtidaada. Waad ugu lug yeelan kartaa si kasta oo adiga kula habboon:

- **Ka soo qaybgal mid ka mid ah munaasabadahayaga:** Waxaan qaban doonaa dhacdooyin dadweyne oo kala duwan oo aad wax badan ku maqli karto aadna fikradaada nagula wadaagi karto. Ku soo biir liiskayaga boostada si aad u noqoto qofka ugu horreeya ee ogaada goorta iyo meesha ay ka dhacayaan, ama ka hubi mareegyatada. Iskaan garee Koodhka QR ee sare.

- **U imow wadahadal saaxiibtinimo leh oo ka dhacaya bandhiggayaga waddada ee bulsheed:** Waxaan ka soo muuqan doonaa goobaha caanka ah ee deegaanka iyo goobaha bulsheed. Ka qaybgal wadahadal khuseeya soo-jeedimaha. Inoo dhaaf tafaasiishaada haddii aad rabto inaan kuu soo dirno jadwalka oo dhammaystiran, ama booqo mareegtayada. Iskaan garee Koodhka QR ee sare.

- **Ka dhammaystir su'aalaha onlaynka:** Ku wadaag aragtidaada meel kasta, wakhti kasta. Iskaan garee Koodhka QR ee sare.

- **Inoo soo dir iimayl haddii aad doorbidayso:** Waxaad si fudud noogu soo diri kartaa ra'yi-celintaada iimayl ahaan **grenfell.engagement@london-fire.gov.uk**

- **Nagu martiqaad inaan kuu imaano:** Haddii aad qayb ka tahay koox, ama aad martigelinayso munaasabad bulsheed ama munaasabad xagaaga dhacaysa, waan ku faraxsanahay inaan kula soo xiriirno oo aan kaala hadalno soo-jeedimaha.

- **Farriin noogu soo dir baraha bulshada:** Waad nagala soo xiriiri kartaa **TikTok** (@londonfirebrigade), **Instagram** (@londonfirebrigade), **X** (@LondonFire) iyo **Facebook** (London Fire Brigade). Farriin toos ah noo soo dir oo nagu xiran si aad u hesho wararkii ugu dambeeyay.

- **Noqo Danwadaag Bulsheed:** Nala qabo kulan yar – isku soo ururi 8–10 deriskaaga ah, saaxiibo, ama xubno qoyseed oo ka socda bulshada North Kensington iyo Grenfell. Kulamadan nasashada leh ee saaxiibtinimada leh waa fursad lagu wadaago mahadhada, qofba kan kale ku dhegaysto, oo gacan looga geysto qaabaynta mashruuca loogu talagalay in lagu abuuro dhaxal macno leh. Markaad dadka isu keento, waxaad gacan ka geysan doontaa hubinta in codadka maxalliga ah la maqlo, la qiimeeyo, iyo inay udub-dhexaad u noqdaan wadatashiga.*

*Waxaan haynaa tiro kooban oo boosas danwadaag ah oo la heli karo. Fadlan dhowaan nala soo xiriir.

Waxaad sidoo kale kala xiriiri kartaa kooxda Mashruuca Grenfell Memory:

- Telefoonka, farriinka gaaban ama WhatsApp-ka: **07385 382 580**
- Iimaylka: **grenfell.engagement@london-fire.gov.uk**
- Boostada: **Grenfell Memory Project, London Fire Brigade, 169 Union Street, London SE1 0LL** Baqshadaha FREEPOST ayaa la heli karaa marka la codsado.

## Ogow wax badan

Si aad u hesho tafaasiil buuxda oo khuseysa Mashruuca Grenfell Memory, iskaan garee koodka QR ama booqo: **london-fire.gov.uk/memory-project/**

## Hel warar joogto ah

Isku diiwaangeli Mashruuca Grenfell Memory liiska boostada – **iskaan garee koodhka QR**

Marka aynu wadajirno, waxaan abuuri karnaa dhaxal macno leh. Turjumaadda buug-yarahan ayaad ku codsan kartaa iimayl ahaan: **grenfell.engagement@london-fire.gov.uk**

Honouring the lives of loved ones lost, creating a lasting legacy.

تكريم ذكرى الأحباء وإنشاء تذكار دائم.

স্থায়ী পরম্পরা গড়ার স্বার্থে হারানো প্রিয়জনদের প্রতি শ্রধাঞ্জলি অর্পণ।

ارج نهادن به زندگی عزیزان ازدست رفته، ایجاد میراثی ماندگار است.

Honorer la vie des êtres chers disparus et créer un héritage durable.

Insieme per onorare il ricordo delle persone care e lasciare un'eredità indelebile.

Honrar as vidas de entes queridos perdidos, criando um legado duradouro.

Odavanje pocasti izgubljenim životima voljenih, stvarajuci trajno naslede.

Maamusida nolosha dadka ehelka ah ee dhintay, abuurista dhaxal waara.

ንህይወት እቶም ዝጠፍኡ እነፍቅሮም ሰባትምኽባር፣ነባሪህድሪ ምፍጣር።

Kaybettiğimiz sevdiklerimizin anısına kalıcı bir miras bırakabilmek için çalışıyoruz.

گزرے ہوئے پیاروں کی جانوں کے اعزاز میں ایک دائمی یادگار کی تخلیق۔

Để tỏ lòng trân trọng sinh mạng của những người thân yêu đã mất, tạo nên di sản lâu dài.

LFB
LONDON FIRE BRIGADE